

Kharashaadka

Markay laba dhinac aadaan dhageysiga maxkamad Victorian Civil and Administrative Tribunal badanaa waa inay iska bixiyaan kharashkooda. Si kastaba ha ahaatee, xaalladaha qaarkood, Maxkamada waxay amri doontaa in hal dhinac bixiyo dhinaca kale kharashkiisa.

Goorma ayaa kharashaadka la amrayaa?

Maxkamadu waxay amraysaa kharashaadka oo kaliya markay rumeysan tahay in hal dhinac uu u dhaqmay si aan macquul ahayn, iyo inay siday u dhaqmeen ay lacag gelisay dhinaca kale. Tusaale, marka hal dhinac uu u:

- > dhaqmo si ku sababtay dhinac kale dib u dhac aan macquul ahayn ama kharashaad dheeraad ah
- > uu soo dalbaday Maxkamada isagoon heysan sabab wanaagsan (tusaale, inuu dhinaca kale oo kaliya 'helo')
- > ku khasbay dhinaca kale inuu arinta maxkamada geeyo xitaa inkastoo ay si cad xaq ugu lahaayeen waxay weydiisanayeen (tusaale, mulkiilaha ayaa diidey inuu saxiixo Foomka Dalabka Debaajiga (Bond Claim Form) inkastoo aysan waxba ku lahayn debaajiga)
- > diidey xalinta tooska ah ee dhinaca kale soo jeediyey, iyo inay caddadka Maxkamadu amartay ay ka yartahay intii loo soo bandhigay (waxaa jira xeerar khaas ah oo khuseeya waxyaalaha wax lagu xalinayo iyo kharashaadka sida hoos ku sharxan)

Kharashaadka iyo waxa la bixinayo si xal loo gaadho

Haddii hal dhinac uu sameeyo wax bixin toos ah si xal loo gaadho lana diido wixii uu bixinayey, qofka diidayaa wax bixinta wuxuu gelayaa khatarta ah in kharashaadka la saaro. Haddii natiijada Maxkamadu aysan ka fiicneyn wixii layidhi waa lagu siinayaa si arinta loo xaliyo, dhinaca yiri waxbaan bixinayaa ayaa weydiin karta Maxkamada inay amarto in dhinaca kale lagu amro bixinta kharashaadkayga laga bilaabo taariikhda wax bixinta la sameeyey.

Tusaale, haddii mulkiilahaagu uu ku siiyey \$1000 si loo xaliyo dalabkaaga magdhowga oo aad diido wax bixintaas, ka dibna Maxkamadu ay kuu amarto \$800, mulkiilaha waxaa la siin karaa kharashaadkii ka baxay laga bilaabo taariikhda ay sameeyeen waxbixinta ilaa taariikhda Maxkamadu dhacayso.

Wax bixinta tooska ah ee wax xalinta kuma badna khilaafka kireysiga. Si xeerarkani ay u qabtaan, wax bixinta wax xalintu waa inay:

- > ay qoraal ahaato
- > ay u furnaato aqbalaad ugu yaraan 14 maalmood
- > qeexan tahay caddadka lacagta la bixinayo, haddii dalabku uu yahay lacag

Wixii aqbalaad ah ee wax bixintan waa inay sidoo kale ahaataa qoraal. Haddii aad hesho wax bixin toos ah oo wax lagu xalinayo mulkiilahaaga, waa inaad si taxadar leh u tixgelisaa inay u eg tahay inaad ku heli karto natiijo ka fiican Maxkamada iyo in kale, adoo maskaxda ku heynaya wakhtiga iyo dadaalka loo baahan yahay inaad timaado dhageysiga maxkamada. La xiriir Ururka Kireystayaasha wixii talo ah (Tenants Union).

Maxaa loo dalban karaa kharash ahaan?

Kharashaadku waxay noqon karaan caddad kasta oo macquul ah oo dhinac ku kharashgareyn karo si uu yimaado Maxkamada oo uu u soo jeediyey kiiskiisa. Kharashaadka wakhtiyadii hore si guul leh loo dalbaday waxaa ka mid ah:

- > ujrada lacagta Maxkamada (oo loo yaqaan ' wixii kaa baxay')
- > kharashaadka safarka (tusaale tigidhka tareenka, batroolka, lacagta baabuur dhigashada,)
- > kharashka aad waayeyso wakhtiga aad ku lumiso u imaanshaha dhageysiga maxkamada
- > kharashka aad ku helayso caddeynta (tusaale kharashaadka sawirka sameyntiisa, warqado sawirida)
- > lacagta ujrada sharciga (haddii dhinacaas ay matelayeen sharci yaqaano)

Eeg bogga kale...

Sidee baad u dalban kartaa kharashaadka?

Haddii aad rumeysan tahay inaad xaq u leedahay kharashaad, waa inaad weydiisaa Maxkamada amar in mulkiilaha ama wakiilku ay bixiyaan kharashka. Waa inaad keentaa caddeyn si aad u tustid caddadka aad lumisay ama ku kharashgareysay imaanshaha Maxkamada (tusaale, warqad aad ka keento loo shaqeeyahaaga, oo sheegeysa caddadka mushaar ee aad waayeyso, caddeynta baabuur dhigashada, tigidhada tareenka iwm). Maxkamadu waxay amri kartaa in Mulkiilaha uu ku siiyo caddad uun, ama amar uu go'aaminayo Masuulka Diiwaanka Maxkamadu inta lagu siinayo.

Haddii adiga iyo mulkiiluhu aad isku raacdaan kharashaadka, waa inaad weydiisaa Maxkamada inay sameeyso amar ay wax toos ah uga dhigto heshiiskaas oo qoraal ah.

Ka waran haddii mulkiiluhu uu soo dalbado kharashaad?

Haddii mulkiiluhu weydiisto Maxkamada amarka kharashaadka, waad ka doodi kartaa inaysan xaq u lahayn in la bixiyo kharashaadkooda. Waxaad sidoo kale murmi kartaa caddadka uu dalbanayo mulkiiluhu haddii aad u maleynaysid macquul ma aha. Maxkamada waxay go'aamineysaa kharashaadka aad bixineyso (haddii ay wax jiraan) ama waxay u gudbineysaa arinta Masuulka Diiwaanka inuu go'aamiyo. Haddii arinta loo gudbiyo Masuulka Diiwaanka, la xiriir Ururka Kireystayaasha wixii tallo ah ee difaacida dalabka mulkiilaha.

Wixii macluumaad dheeraad ah taleefan u dir Khadka Tallada Ururka Kireystayaasha (Tenants Union Advice Line) ☎ (03) 9416 2577.